


Waa maxay Daawada Fayraska ee Afka laga qaato?



Kaniiniyadu waxay ka caawiyaan qofka qaba COVID-19 inuu bogsoodo.

Haddii aad khatar ugu jirto xanuunka daran ee COVID-19 lagaana helay caabuqa COVID-19 intii lagu jiray 5 ta maalmood ee lasoo dhaafay, waxaad qaadan kartaa kaniiniyada afka laga qaado ee fayraska ee dhakhtarku qoro. Lab daawo ayaa la heli karaa: [Paxlovid™](#) (Pfizer) iyo [legevirio](#) (Merck). Waxaad u qalmi kartaa mid kamid ah daawooyinka lagu daaweeyo COVID-19 ayadoo ku xiran da'daada, taariikhda caafimaadka, iyo muddada aad qabtay astaamaha xanuunka.

Daawada fayraska ee afka laga qaato ayaa ka caawin karta jirkaaga inuu la dagaalamo COVID-19 asagoo ka joojinaaya fayraska SARS-CoV-2 (oo ah fayraska keena COVID-19) inuu ku laba jibaarmo jirkaaga dhexdiisa, asagoo yaraynaaya cadadka fayraska ee ku jira jirkaaga, ama caawinaaya nidaamka difaaca jirkaaga. Markaad daawada qaadato, waxaad dareemi kartaa astaamaha daran oo yar waxaana yaraan kara suurtagalnimada ah in xanuunkaagu kasii daro aadna u baahato in isbitaal lagu dhigo.

• SIDEE AYAAN U QAATAA DAAWADA FAYRASKA EE AFKA LAGA QAATO?

Qaadashada daawada fayraska kahortagta ee afka laga qaato waxay ka dhigan tahay inaad kaniini cuni doonto. Waa inaad u qaadataa daawada fayraska ee afka laga qaato sida uu kuu sheegay dhakhtarkaagu. Aka boodin kuurooyinka ama ha cunin kuurooyin dheeraad ah haddii aad illoowdo kuuro. Waa inaad u qaadataa dhammaan daawada sida laguugu qoray ilaa aad ka dhamaysato ama ilaa dhakhtarkaagu uu kuu sheego inaad joojiso. Daawada fayraska ee afka laga qaato waxaad ku cuni kartaa cunta ama cunto la'aan waxaana lagu talinayaa inaad kaniinka oo dhan isku liqdo, ayadoo burburin ama jajabin.


• KA WARAN HADDII AAN QABO XANUUN UUR KU JIRTA AH SIDA XANUUNKA KALYAHA AMA BEERKA?

Kahor intaan qaadan wax daawo ah, waa inaad kala hadashaa xaaladaha caafimaad ee aad qabto dhakhtarkaaga. Tan waxaa kamid ah inaad u sheegto xaalado kasta oo caafimaad oo aad horay u qabtay iyo daawooyinka laguugu qoray, daawooyinka qandho jabinta, feetamiinnada, iyo kaalmaatiyada aad qaadato.

Dadka qaba xanuunnada kalyaha ama beerka waa inay u sheegaan dhakhtarkooda xanuunka ay qabaan kahor intaan daawada fayraska ee afka laga qaato loo qorin. Dhakhtarkaaga ayaa go'aamin kara haddii daawada fayraska ee afka laga qaato kugu habboon tahay iyo haddii kale iyo haddii kuuradaadu kugu habboon tahay. Daawooyinka qaar ayaa loo diidi karaa dadka qaba xanuunnada qaar.

- **KA WARAN HADDII AANAN U QALMIN DAAWADA FAYRASKA EE AFKA LA QAATO?**

Dhakhtarkaaga ayaa go'aamin kara inaad u qalmin daawada fayraska ee afka laga qaato ama aysan kugu haboonayn. Waxaa jiri kara sababo badan oo arintaan keeni kara. Waxaa suurtagal ah inaad buuxin dhammaan shuruudaha u qalmida, ama waxaad qabi kartaa xanuun aan ku haboonayn inaad cunto daawooyinka qaar. Kala hadal dookhyada daawada ee kuugu habboon dhakhtarkaaga.



DOH 825-029 May 2022 Somali

Si aad dukumiintigaan oo qaab kale ah u codsato, wac 1-800-525-0127. Macaamiisha dhagoolka ah ama kuwa maqalkoodu culus yahay, fadlan waca 711 (Washington Relay) ama iimayl u dir <mailto:ecivil.rights@doh.wa.gov>.